



<input type="checkbox"/> Mail Address (232) <input type="checkbox"/> SS# CHG (232) <input type="checkbox"/> Physical ADD (233) ADD CHG DEL	<input type="checkbox"/> VISA USCIS Doc _____ Voter Registration <input type="checkbox"/> Yes <input type="checkbox"/> No	EDL (33)  TOTAL FEES:
---	--	-----------------------------

**Su'aalo/Shahaado**

1) Ma waxaad tahay askari Milatari Mareykanka oo howlgab ah oo ma waxaad rabtaa in ruqsadaada lagu soo qoro “ <b>VETERAN</b> ”? Haddii ay sidaas tahay, waa inaad buuxisid Shahaadada Heerka Askariga Howlgabka ee Vermont ( <b>Foomka DMV VG-168</b> ) aysan ka ahayn haddii horey aad u soo gudbisay mooyee.	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
2) Ma jeceshahay in laguugu qoro in aad tahay xubin ama unug jir deege?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
3) Miyaad cadeyneysaa inaad tahay qof Degan Vermont <sup>1</sup> ?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

**Aqoonsiga dhabta ah, EDL & Diiwaangelinta Cod-bixiyaha**

Ma waxaad tahay Muwaadin Mareykan ah?	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Su'aashan waad isaga boodi kartaa haddii aad codsaneysid Kaarka Mudnaanta oo aadan isdiiwaangelin inaad codeyso.	Haddii aadan AHAYN Muwaadin Maraykan, ma haysataa caddeyn joogitaan sharci ah?	<input type="checkbox"/> IMA QUSEYSO <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
---------------------------------------	--	--	--	---

**Magaca, Cinwaanka ama Isbedello Kale**

Ma bedeshay magacaaga?	Ma bedeshay cinwaankaaga?	Ma bedeshay cinwaanka aad degan tahay?	Isbedel(Isbedello) kale:
<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

*Haddii ay ku khuseyso, ku qor dhammaan magacyadii hore sida ay ugu qornaayeen rukhsadihii hore.*

**Diiwaangelinta Cod-bixiyaha**

Waxaa lagaa diiwaangelin doonaa inaad cod bixiso aysan ka ahayn haddii aad diido inaad iska diiwaangeliso xagga hoose. Adiga oo saxiixaya oo soo gudbinnaya arjiga, waxaad Waaxda Gawaarida aad u fasaxaysaa inay codsigan u gudbiyaan Xoghayaha Gobolka ujeedooyinka diiwaangelinta codbixiyeyaasha la xiriira awgeed. WAAD ISKA DIIDI KARTAA IN AAD ISDIIWAANGELISO. Labada xafiis ee aad ku gudbiso arjigan iyo go'aanka ah inaad isdiiwaangeliso iyo inkale labaduba waxay ahaanayaan xog asturan waxaana loo isticmaali doonaa ujeedooyinka diiwaangelinta codbixiyaasha oo keliya. Si laguugu diiwaangeliyo inaad codeyso, waa inaad:

- 1) ahaataa muwaadin Mareykan;
- 2) ahaataa qof Vermont degan;
- 3) qaadataa dhaarta codbiyaha; iyo
- 4) tahay 18 sanno jir ama aad ka wayn tahay;

Qof kasta oo buuxiya shuruudaha 1 - 3 oo noqonaya 18 sano jir taariikhda ama kahor intaan la gaarin taariikhda doorashada guud wuu isdiiwaangelin karaa oo u codeyn karaa doorashooyinka hordhaca ah ee isla markiiba ka horreeya doorashada guud. Ka gaabinta inaad diido isdiiwaangelinta waxay cadeyn u tahay inaad buuxisay shuruudaha codbixinta.

Haddii ay tahay markii ugu horeysay ee aad ka codeyneys Vermont waa inaad qaadataa DHAARTA COD bixiyaha:

*Waxaad si adag ugu dhaaranaysaa (ama xaqiijineysaa) in markasta oo aad codkaaga dhiibatid ama aad dhiibatid, adiga oo taabanaya arin kasta oo quseysa Gobolka Vermont, waad sameyn doontaa sidaa darteed sida damiirkaaga ah aad u xukumi doonto inta badan waxay u horseedi doontaa wanaagga isku midka ah, sida oo lagu aassaasay Dastuurka iyada oo aan cidna laga baqayn ama loo danaynayn.*

Marka aad haasta saxiixdo waxaad ku markhaati kici kartaa naftaada inaad qaadatay Dhaarta. Waxaad sidoo kale heli kartaa qof kasta oo 18 sano ka weyn oo markhaati ka noqon kara inaad dhaartay.

Haddii cinwaankaaga aad bedeshay, ku qor cinwaankii ugu dambeeyay ee laga diiwaan geliyay inaad ka codeyso. **(Ha buuxin aysan ka ahayn illaa hadda aad aad diiwaangashan tahay in aad ka codayso cinwaankaagii hore):**

Cinwaanka Jidka	Magaalo/Magaalo yarta	Deegaanka (County)	Gobolka
-----------------	-----------------------	--------------------	---------

**Ha** i diiwaangelin si aan u codeeyo ama aan u cosboonaysiiyo. diiwaangelinta cod-bixiyaha. Waan diidey inaan isdiiwaangaliyo si aan u

<sup>1</sup> 23 VSA §4 "Degane,"... waxaa loola jeedaa qof kasta oo ku nool Gobolka oo damacsan inuu Gobolka ka dhigto meeshiisii ugu horreysay ee degsiimadiisa si joogto ah ama tiro sannado ah oo aan la cayimin ku sii noolaado. Iyadoo aan la xadidaynin fasalka nooca aan deganayn sida ku cad qodobada qaybtan, dadka ku nool Gobolka ujeeddo gaar ah oo ku lug leh waqti qeexan, oo ay ku jiraan ardayda, shaqaalaha muhaajiriinta ah ee ka shaqeeya shaqooyinka xilliyeed, iyo dadka lagu shaqaaleeyay qandaraas leh muddo go'an, ma ahan degane ujeedooyin cinwaankan keliya....

codeeyo, ama ma buuxinayo dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka codbixinta.

Waxaan halkan ku cadeynayaa, iyadoo ciqaab lagu mutaysanaayo ciqaab been sheegidda, in macluumaadka ku yaal foomkaan ay run yihiin inta ogaalkayga ah. Baaqaan waxaa lagu sameeyay iyadoo la hoos imaanayo ciqaabta 23 VSA § 202 & § 4110. Soo gudbinta arji diiwaangelin cod-bixiyaha oo been ah waxaa lagu muteysan karaa ciqaabta beenta sida ku xusan 17 V.S.A. § 2011 iyo kan 42 U.S.C. § 1973 gg – 10.	<b>Saxiixa Arji qortaha</b>	<b>Taariikhda la Saxiixay</b>
	X	
Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka (haddii codsaduho ka yar yahay 18 sano jir). Waxaan halkan ku ansaxinayaa bixinta ruqsada/oggolaanshaha barashada: <input type="checkbox"/> Waalidka <input type="checkbox"/> Mas'uulka Sharciga	<b>Saxiixa Waalidka ama Mas'uulka Sharciga</b>	<b>Taariikhda la Saxiixay</b>
Telfoon Lambar:	Cinwaanka Imelka:	

## Noocyada Aqoonsiga la heli karo:

- **Aqoonsi Real ID:** A Kaarka Aqoonsiga Read ID ga wuxuu buuxiyaa shuruudaha heerarka Federaalka ee soo saarista. Aqoonsiga Real ID ayaa looga baahan yahay ka duullista diyaaradaha ganacsiga iyo gelitaanka xarumaha qaarkood ee ay maamusho dowladda dhexe (maxkamadaha federaalka, dhismayaasha dowladda dhexe, saldhigyada militariga).
- **Kaarka Mudnaanta (Privilege Card) (DPC):** DPC waa kaar ay ku calaamadeysan tahay "Ma ahan Aqoonsi Federaal ah" oo MA AHAN Aqoonsiga Real ID ah. Bixinta ama helitaanka DPC uma baahna caddeyn ah in wadanka aad sharci ku joogto ama dhalasho Mareykanka ah.
- **La wanaajiyay (EDL):** EDL waa kaar aqoonsi oo Real ID ah oo waa aqoonsi buuxiyay shuruudaha oo ayna la socoto manfacn dheeraad ah oo ah inay tahay dukumiinti ku habboon xadka laga gudbo oo muwaadiniinta Mareykanka u oggolaata inay ku soo galaan markay ka soo soctaana waddamada Kanada, Mexico, Caribbean ama Bermuda, dhinaca dhulka ama badda. Waa inuu degan yahay Vermont OO Muwaadin Mareykanna yahay

**OGSOONAW:** Dhammaan soo saarista ah (markii ugu horreysay) Kaararka Aqoonsiga waa in si shaqsi ah looga codsadaa xafiiska DMV. Codsiga waa inuu ku qornaadaa saxiixa shaqsiga codsanaya, oo saxiixa waa inuu khad ahaadaa. Haddii codsaduho ka yar yahay 18 sano jir, oggolaansho qoraal ah ee codsadaa waalidkiis, mas'uulka sharciga, ama qof kale oo waalidka ayaa loo baahnaa doonaa.

## DUKUMENTIYADA LA ISKA DOONAYO

Codsadeyaasha cusub iyo macaamiisha beddelaya magaca, taariikhda dhalashada, goobta dhalashada ama SSN waa inay soo bandhigaan dukumentiyada looga baahan yahay mid kasta oo ka mid ah afartan qaybood. Looma baahna cusbooneysiinta marka aad wax ka bedelayn ama bedel aadan ku sameynin magaca, TDH, POB ama SSN.

1. **Aqoonsiga iyo taariikhda dhalashada** - Waa inuu bixiyaa **mid** ka mid ah kuwa soo socda:
  - Baasaboar ansax ah, aan dhicin,
  - Diiwaanka la xaqiijiyay ee dhalashada xaaladda guurka, korsashada, ama furitaanka codsadaa, oo ay ku irto tarjumaad haddii loo baahdo
  - Warbixinta Dhalashada Dibadda ee Qunsuliyadda (CRBA) oo ay soo saartay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka (Foomka FS-240, DS-1350 ama FS-545)
  - Dukumiinti aqoonsi qunsuliyadeed oo ansax ah oo ay soo saartay dowladda Miksiko, Guatemala (ama dowlad kasta oo kale oo leh heerar iyo nabadgelyo isbarbardhig ah, sida uu go'aamiyo Guddiga)
  - Kaarka Deganaanshaha Joogtada ah oo ansax ah, oo aan dhicin (Foomka I-551)
  - Shahaadada Jinsiyadda oo ay bixisay DHS (Foomka N-550 ama Foomka N-570)
  - Shahaadada Jinsiyadda (Foomka N-560 ama Foomka N-561) ee ay DHS soo saartay
  - Kaarka darawalnimada/kaarka aqoonsiga (ma ah inuu dhacsanaado wax ka badan hal sano).
2. **Macluumaadka Sooshiyaal Sikiyuuritiga** - Waa inaad keentaa kaarkaaga Sooshiyaal Sikiyuuriti ama warqad ka socota Maamulka Sooshiyaal Sikiyuuriti oo muujinaysa u-qalmitaan la'aanta inaad hesho lambarka Sooshiyaal Sikiyuuriti (SSN).

Haddii kaarkaaga Sooshiyaal Sikiyuuritiga aan la heli karin, waxaa la isticmaali karaa mid ka mid ah foomamkan soo socda bedelkiisa. Foomka W-2, foomka SSA-1099, jeega mushaharka muujinaya iyo SSN (ugu yaraan 4 ta lambar ee ugu dambeeya) (Magacaagu waa inuu caddaysan yahay Mas'uuliyiinta Soshal Sekiyuuritiga). Haddii ay jireen isbeddelo badan ee dhanka magacaaga, waa inaad keentaa dukumiintiyo si loo caddeeyo sii socoshada magacyada. Tusaale ahaan: guurka ama shahaadada midowga madaniga ah (nuqul la caddeeyay oo ay soo saartay dowladda hoose (degmada), guurka ama kala dirida ururada bulshada ama dukumiintiga maxkamada horteeda dukumintiga bedelka.)
3. **Deganaanshaha Vermont iyo cinwaanka degaanka ee hadda** - Waa inaad soo bandhigtaa **laba** dukumiinti oo ay ku jiraan magacaaga iyo cinwaanka deegaanka Vermont ee hadda aad degan tahay oo muujinaya deganaanshaha gobolka Vermont.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

  - warqad oo magaca ku qoran oo magacaaga hadda kuugu timid iyo cinwaanka Vermont oo ay ku jiraan magaalada/magaalada (ee aan ahayn sanduuqyada PO),
  - biilasha guriga ku baxa (waa inuu ku qornaadaa cinwaanka guriga)
  - biilka cashuurta ee guriga oo ay ku taal cinwaan guri,
  - heshiiska kirada oo saxiixan,

- Shahaadada caymiska kireystaha/milkiilayaasha guryaha (caddayn/caymiska sheegashada)
- Kaarka Vermont EBT ama kaarka aqoonsiga Vermont AIM,
- Shahaadada Degenaanshaha Vermont.

4. **Sharci ku Jooga Mareykanka (Kaliya waxaa looga baahan yahay Aqoonsi Real ID & EDL)** - Xaaladaha badankood dukumiintiyada looga baahan yahay caddeynta aqoonsiga iyo taariikhda dhalashada ayaa sidoo kale ka dhigi doonta xaalad sharci ee Mareykanka dhexdiisa. Muwaadiniinta ajnabiga ah waa inay keenaan baasaboorka iyo fiiso, kaarka rasiidka diiwaangelinta shisheeyaha (kaarka green card ka), ama caddeyn kale oo joogitaanka sharciga ah ee kormeerka iyo koobiyenta.

### **(EDL) LA WANAAJIYAY**

Taa waxaa raacsan dukumiintiyada kor ku xusan EDL waxay u baahan tahay caddeyn dhalasho Mareykan ah.

- Shahaadada dhalashada oo asal ah oo ay soo saartay qayb ka tirsan dowladda Mareykanka ama dhul gaar u go'an oo Mareykanka ka tirsan.
- Baasaboorka Mareykan ah oo ansax ah, aan dhicin ama kaarka baasaboorka.
- Shahaadada Jinsiyadda (N-560 ama N-561). Shahaadada Jinsiyadda (N-550, N-570 ama N-578).
- Warbixinta Dhalashada Dibadda ee Qunsuliyadda oo ay soo saartay Waaxda Arrimaha Dibadda ee Mareykanka (FS-240, DS-1350 ama FS-545)

### **UJRADA:**

- Aqoonsi oo Aan Ruqsada Darawalnimada ahayn, Cusub/Cusboonaysiin ah - \$ 24,00
- Aqoonsi Aan Ruqsada Darawalnimada ahayn, Nuqul - \$ 20,00
- Aqoonsi Aan Ruqsada Darawalnimada ahayn Kharashka SSI ee la dhimay - \$ 10,00

Khidmadaha la Dhimay ee SSI/SSD (Kaliya Aqoonsiga Aan Ruqsada Darawalnimada ahayn): Shakhsiga hadda qaata Dakhliga Kabka ah (Supplemental Security Income) (SSI) ama Soshal Sekiyuuratiga Naafada (Social Security Disability) (SSD) wuxuu xaq u leeyahay lacag dhimis ah Aqoonsiga Aan Ruqsada Darawalnimada ahayn. Caddaynta SSI ama SSD ayaa looga baahan yahay waqtiga adeegga. Tan waxaa lagu samayn karaa adiga oo Waaxda u soo gudbiya warqad xaqiijinaysa manfaca. Nuqul ka mid ah warqadda xaqiijinta manfaca waxaa lagu heli karaa iyadoo Soshal Sekiyuuratiga laga xiriirayo dhanka taleefanka, boostada ama aad tagto.

### **ISOOR SI AAD U CUDEYSO**

Haddii aad xaq u leedahay, maanta ayaa lagaa diiwaangelin doonaa inaad codeeyso aysan ka ahayn haddii aad diiddo mooyee. Waxaad xaq u leedahay inaad ka codeeyso magaalada ama degmada aad hadda degan tahay haddii Maalinta Doorashada aad, adiga:

- tahay muwaadin Mareykan ah
- tahay qof degan Vermont
- tahay qof jira 18 sano jir
- qaadato Dhaarta Codbixiyaha.

Waxaad tahay "degane" sida hoos timaada sharciga Vermont haddii aad ku nooshahay magaalada sida lagu caddeeyey oo sii wadayso in aad si joogto ah u deganaanayso iyadoo aan xadidnayn oo aadna ku laabato halkaas haddii si ku meelgaar ah aad ugu maqnaado, oo ay weheliso ficil ama ficillo u dhigma ujeeddadaas.

Hal jeer kaliya ayaa ubaahantahay inaad qaadatid Dhaarta Codbixiyaha. Haddii aad horey uga diiwaangashanayd inaad ka codbixiso Vermont horey ayaa u qaadatay Dhaarta Codbixiyaha. Waad cadeyn kartaa inaad adigu qaadatey dhaarta codbixiyaha ama shaqaalaha DMV ayaa kaa qaadi kara Dhaarta Codbixiyaha.

Si rasmi ah ugama diiwaan gashanid ilaa Karaanigaaga Magaalada ama Degmadaada uu dib ugu eegayo arjigaaga si loo hubiyo inaad buuxisay dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka. Karaaniga ayaa si qoraal ah kugu soo ogeysiin doona haddii arjigaaga la ogolaado oo wuxuu kugu wargalin doonaa meesha aad ka codbixin doonto. Haddii arjigaaga la soo diido, Xoghaynta ayaa ku ogeysiin doonta sababta oo kuu sharaxi doonta sababta aadan xaq ugu lahayn waxayna sidoo kale kuu sharxi doontaa sida aad rafcaan uga qaadan karto Guddiga Maamulka Madaniga ee Magaaladaada ama Degmadaada. Haddii aad su'aalo qabtid, Xafiiska Xoghayaha Gobolka (Secretary of State) ayaa waxaad ka wici kartaa lambarka 802.828.2363 ama booqo [sos.vermont.gov/elections/voters/](https://sos.vermont.gov/elections/voters/).